# Jamhuuriyada Somaliland
# Dawladda Hoose Ee Hargeisa
## Aggaasimaha Dhulka D/Hoose Hargeisa

**Ref/DH/GHDDH/689/2024**

**Date: 1th /12/2024**

**Ku:Maamulka Geosol** **=Hargeysa=**
**Og: Xoghayaha Fulinta Dhh** **=Hargeysa=**
**Og: k/X/ Duqa Caasimada Jsl** **=Hargeysa=**
**Og: Duqa Caasimada Jsl** **=Haregysa=**

## Ujeedo: tirtirid file

**Mudane**

Anigo tixraacaya go'anka sumadiisu tahay **go'aan LR:758/2024** kuna taarikhaysan **29th october 2024** waxan halkan idiinku soo gudbinaya **TR:41340** kuna qoran yahay muwadinka magaciisu yahay **Maxame Aadan Xuseen.**

Hadaba dhulkan oo ku yala **Degmada 31 May** cabirkiisuna yahay **(1+3/2*24=165msq)** kaso ka so samaystay wajahadda hore ee TR-ka hoos ku xusan ee uu leyahay muwadinka magaciisu yahay **Nimcaan C/laahi Cumar** kaso cabirka dhulkiisuna yahay **(24*15m)** lehna **TR-41550.**

Sidaad darteed waxan joo jeedinaya in **tr: 41340 tirtiro** iyadoo loo raacayo **Go'aanka fulinta,**sido kalena ay soo xaqiijiyeen **madaxa qorshaha degmada, Gudoomiyaha Degmada,Gudoomiyaha Gudida Dabagalka** .

**Signature**

**Axmed Jaamac Aadan**
**Aggasimha Waaxada Dhulka**

Email: axmed631@mail.com

Tell: +252-634441845

Go'aan Lr: 758 /2024.

Date: 29th October 2024.

## Go'aan Guddi Fulineed.

Shir ay isugu yimaadeen guddida fulinta Caasimada Hargeysa **29th October 2024**, Shir Guddoomiyena uu ka yahay Duqa Caasimada Hargaysa Mudane **(C/kariim Axmed Mooge)**, Kuna saabsanayd Tirtirid Tr-ka **41340** ee uu ku qoran yahay Muwaadin **(Maxamed Aadan Xuseen)**, Dood & falan-qayn dheer ka dib: -

## Guddida Fulintu: -

| | |
|---|---|
| **Markay Arkeen** | Qoddobka **2aad**, farqadiisa **1-aad** ee Xeerka Maamulka Dhulka iyo Magaalooyinka Xeer **Lr: 17/2001**, oo tilmaamaya Awooda Maamulka iyo dhul bixinta ee Dawlada Hoose Hargeysa. |
| **Markay Arkeen** | Warqada No: **DHH/XD31M/338/2024**, ee ku taariikhaysan **20/10/2024**, Ujeedadeeduna ahayd Tirtirid Tr-ka, kana soo baxay Gudoomiyaha Degmadda 31 May. |
| **Markay Arkeen** | In Muwaadinkaasi fayl uu ka sammaystay wajahada hore ee Muwaadinka kale ee Magaciisu yahay **Nimcaan C/laahi Cumar**, lagama-maarmaanna ay noqotay in la tirtiro Tr-ka **41340** ee ku qoranyahay Muwaadin |
| **Markay Xaqiiqsadeen** | In ay waajib tahay in Muwaadinkaasi hoos ku xusan laga tirtiro Faylka (TR) uu ka samaystay wajad muwaadin kale iska leeyahay, maadaama ay soo xaqiijiyeen Madaxa Qorshaha Degmada, Gudoomiyaha Degmada & Gudoomiyaha Gudida Hubinta & Dabagalka Dhulka in la tirtiro. |
| **Markay Tixgeliyeen** | Tallada Masuuliyiinta ay hawshani khusayso. |

## Waxa ay Go'aansadey: -

Ka dib markay arkeen dhamaan asbaabaha sare ku xusan, Guddiga fulintu wuxuu Go'aansadey in la tirtiro Tr-ka **41340**, kuna qoran yahay muwaadinka magaciisu yahay **Maxamed Aadan Xuseen,** Cabirkiisuna yahay **(1+3/2*24= 165m²)**, kaas oo ka soo samaystay wajahadda hore Trka hoos ku xusan ee dhulka uu isla leeyahay Muwaadin **Nimcaan C/laahi Cumar,** Cabirkiisuna yahay **(24*15M)**, kuna yaala Degmada: **31 May,** Tr-kiisuna yahay **41550**, isla markaana loo sii daayo maadaama ay soo xaqiijiyeen Madaxa Qorshaha Degmada, Gudoomiyaha Degmada & Gudoomiyaha Gudida Hubinta & Dabagalka Dhulka in la tirtiro.

Allah Mahad leh.

**(Siciid Nuur Jaamac).**
**Xoghayaha Fulinta D/Hoose ee Hargeysa**

**(Khadar Axmed Cumar 'Khadar Nuur')**
**Ku-xigeenka Duqa Caasimada Hargeysa.**

**(C/kariim Axmed Mooge).**
**Duqa Caasimada Hargeysa, ahna Gudd/**
**Golaha Degaanka Caasimada Hargeysa.**

ic Of Somaliland
eisa Municipality

D.H.H
DAWLADDA HOOSE EE HARGEYSA
HARGEISA LOCAL GOVERNMENT
HARGEISA MUNICIPALITY

Jamhuuriyada Soomaaliland
Dawladda Hoose Ee Hargaysa

**DEGMADA 31 MAY**

Ref: DHH/XD31M/ 338 /2024
Date: 20/ 10/2024

**Ku: Duqa Caasimadda J S L** **Hargeysa**

Ujeeddo: warbixin dhul

**Mudane Mayir**

Waxa aan qoraalkan kuugu soo gudbinayaa. **Aniga** oo tixraacaya warbixinta **Madaxa Qorshaha Degmada,** kuna taariikhysan. **20/10/2024,** ujeedadeedu tahay warbixin dhul.
Tixraac ***qoraalka ku taariikhaysan 14/10/2023 ujeedadiisuna tahay warbixin waddo ka soo baxaday xafiiska Gudida Hubinta iyo Dabagalka Dhulku. kuna lifaaqan qoraalkan.***

Hadaba mudane mayir hadaan kaaga warbixino faylka uu ku qoran yahay muwaadinka magaciisu yahay **Nimcaan Cabdilaahi Cumar** kuna yaala **Degmada 31ka May**.gaar ahaan **Tr:41550** Cabirkiisuna yahay**24X15M** .Sida madaxa **Qorshaha Degmadda** iyo **Gudida Hubinta** iyo dabalka dhulku soo cadeeye waxa si sharci daro ah looga sameeyey wajahada dhulka **Nimacaan** fayl leh trno **41340** .

Sidaas Darteed, **Mudane Mayir** waxa aan soo jeedinayaa in faylka la Cancelo. Faylka sharciga ah ee Tr **41550 haloosiidaayo.**

Ku: Abdiqadir
Waxaad u sameysaa jooc — loogu cancel
gareeynayo faylka
28/10/2024

***ALLAH MAHAD LEH***

***(Cabdiraxmaan Aadan Maxamuud (Qoor-Gaab)***
***Guddoomiyaha Degmadda 31 May***
***Dawlada Hoose Ee Hargeysa***

GUDOOMIYAHA DEG/ 31 MAY
DHH
DAWLADDA HOOSE EE HARGEYSA
20/10/2024

Jamhuuriyada Somaliland
Dawlada Hoose Hargeysa

Republic Of Somaliland
Municipality Of Hargeisa

**Xafiiska M/qorshaha Degmada 31May D.H.H**

*Ref: DHH/WDH/XD31M/0048 /24*

***Date 20/ 10/ 2024***

KU: GUDOOMIYE DEGMADA 31 KA MAY

**UJEEDO : WARBIXIN DHUL**

**Mudane gudoomiye** hadaan kaaga warbixiyo dhulkan uu leeyahay muwadinka magaciisu yahay nimcaan c/aahi cumar **TR:41550** dhulkan oo cabirkiisu yahay (24*15m) jihooyinkiisuna kala yihiin ( bari : waddo inta kale dhisme)

Aniga oo tixraacay warbixinta ay qoreen gudidda hubinta dhulka **Ref/DH/GHDDHI_0172/2023** hadaba markaan tagay goobta soona hubiyay waa dhul baanaan ah oo qorshaha waafaqsan isla markaana si sharci daro ah looga sameeya wajahada dhulka **TR:41340** waana in la cancel **TR:41340** GPS kiisa waan ugu soo lifaqay cadaynayay in aanu qorshaha waafaqsanayn TR:41340.

Sidaa darted warbixinta dhulkani waa sidaa sare ku xusan.

***Allah Mahad Leh***

**ENG: AWEYS MAXAMAD IBRAAHIM**

**M/Qorshaha Degmada 31May**

MADAXA QORSHAHA DEGMADA 31 MAY D.H.H



Lane 232,8th Avenue
TR-41550
Lane 61,23rd Street
TR-41340
23rd Street
TR-49478
TR-22586

**Jamhuuriyada Somaliland**
**Dawlada Hoose Hargeysa**

**Republic Of Somaliland**
**Municipality Of Hargeisa**

*Xafiiska Hubinta Iyo Dabagalka Dhulka*

*Ref/DH/GHDDH/_0172/2023.*

*Date: -14/10/2023*

=Hargeysa.

Ku: gudoomiyaha 31 may
og: xoghayaha fulinta

Og :duqa caasimada

Ujeedo: - Warbixin wado

Mudane maayir

Waxaan Halkan Kuugu soo gudbinayaa Warbixinta Soo Hubin wado. Dhulkani waa dhul ku yaala 31 MAY. anaga oo eegayna codsiga kasoo warbixinta wado ee kasoo baxday madaxa qorshaha ee dagmada

Gudidu hubinta iyo agaasimaha dhulku goobta way tageen iyagoo hubinaya qorshaha, waxa laysla gartay in sakada dhisan ee galbeedka kasoo jeeda ee uu ka mid yahay seeska **CAASHA MAXAMED SAALAX** layn dhismeedkeeda aan lasoo dhaafi karin

**Allaa Mahad Leh**

| No | Magaca | Xilka | Saxeexa |
|---|---|---|---|
| 1 | Eng:maxamed yuusuf cismaan | Agaasimaha dhulka | |
| 2 | Eng: axmed cismaan xandule | G.Guida Hubinta Iyo Daba Galka Dhulka | |

DAWLADDA HOOSE EE HARGEYSA
AGAASIMAHA WAAXDA DHULKA
D.H.H
HARGEISA MUNICIPALITY

HARGEISA LOCAL GOVERNMENT
GUDIDDA HUBINTA IYO DABAGALKA DHULKA
D.H.H
LAND AUDITORS
DAWLADDA HOOSE EE HARGEYSA